


# Tartanka Sawirada 2020 ee USAID Soomaaliya

USAID Soomaaliya waxay saxiib iyo jaalba la tahay dowladda iyo dadka Soomaaliyeed waxayna xafiis rasmi ah ku leedahay magaalada Muqdisho. Waxaan bilownay tartankan sawir qaadista ah si aan fursad u siinno Soomaalida inay dalkooda horumarkiisa ka sheekeeyaan. Sawir qaadayaasha guuleysta waxaa lagu soo bandhigi doonaa baraha isgaarsiinta USAID ee Soomaaliya sida kalandarrada, baraha bulshada, boorar iyo meelo kale.

1. **YAA KA QEYB QAADAN KARA TARTANKA?**

Kaliya muwaadiniinta Soomaaliyeed ee hadda ku nool Soomaaliya ayaa xaq u leh inay ka qeyb galaan oo ku guuleystaan tartankaan. Hadii aad leedahay xirfada sawir qaadis ama aadan laheynba waad ka qeyb qaadan kartaa tartankan oo waad ku guleysan kartaa. **Gelitaanku waa 100% BILAASH**, wax lacag ah lagama qaadayo tartamayaasha sawirka. Dhammaan sawirada uu qofka soo gudbinayo waa inay ahaadaan kuwa isaga uu leeyahay asal ahaan. Lama aqbali doono sawir soo gudbin aan lagu soo hagaajin wadada/kanaalka rasmiga ah ee tartanka.

*************************************************************************

2. **IMISA SAWIRRO AYAAN SOO GUDBIN KARAA?**

Waxaad soo gudbin kartaa ugu badnaan 5 sawir guud ahaanba!

*************************************************************************

3. **SAWIRRO NOCEE AH AYAAN SOO GUDBIN KARAA?**

Dhamaan sawirada waa inay la xiriiraan qeybaha hoos ku xusan waana in laga qaadaa gudaha soomaaliya. USAID waxay xaq u leedahay inay ka joojiso gelitaan kasta oo loo arko inuusan ku habboonayn ama uusan waafaqsanayn qaybaha hoose.

- Dhaqanka: Sawirro muujinaya soomaalinnimo - waxaa ka mid noqon kara qoob-ka-ciyaarka, hab-nololeedka, isboortiga, cuntada, dharka, farshaxanka iyo labiska.
- Horumar: Sawirro muujinaya kaalmada USAID ee Soomaaliya siiso sida ay ugu qeyb qaadatay ama uga qeyb qaadaneyso horumarka Soomaaliya.
- Halgamayaalka: Sawirrada muujinaya halyeeyada qaranka ama degmooyinka amaba dadka kugu dhiirrigeliya wax qabadka oo dadkooda u sameynaya adeeg dheeri ah..
- Muuqaalka dhulka: Sawirada caasimadaha iyo magaalooyinka, xeebaha, beeraha, dhirta, buuraha iwm.

- Horusocod: Sawirro muujinaya sida Soomaaliya ay ugu tallaabsatay horumarka.. Tusaale ahaan: kaabayaasha dhaqaalaha, farshaxanka, isboortiga, iwm. Sawirradu waa inay ku jiraan dad wax qabanaya (maahan oo kaliya qof istaagan ama fiirinaya kaamerada. Dadku waa inay ahadaan kuwa wax sameynaya/shaqeynaya ama hawl gacanta kula jira). Sawirrada sidoo kale waxay ahaan karaan kuwa muujinaya "kahor iyo kadib," ama "marki hore iyo hadda" mise isbeddel muujinaya.

-----------

- Sawirradu waa inay ahaadaan kuwo tayo sare leh oo aan ka yarayn 1 MB
- Kaliya qaababka JPG iyo PNG ayaa la aqbali doonaa
- Waa inaanay jirin xuduudo, calaamado, xuquuqda daabacaadda, calaamadaha aqoonsiga, ama tixraacyo kale oo muuqda iyo ama calaamado kale oo ka dhex muuqda sawirka
- Sawir walba oo la soogudbiyo waa inuu lahadaa macluumaadka soosocda: a) Taariikhda sawirka la qaaday b) goobta sawirka (magaalada, gobolka) d) Sharaxaad kooban (1-3 weedho) sawirka oo ah magacyada dadka ama meelaha sawirka.

****************************************************************************

**XEERARKA TARTANKA**

Tartanka wuxuu furan yahay laga bilaabo **Talaaddo, Oktoobar 13-keeda ilaa iyo Talaado, Nofeembar 3-deeda**. Xilliga kama dambeyska ah ee dhammaan soo gudbinta waa 11:59 PM saacada Afrikada Bari bisha Noofambar 3-deeda. Wax soo gudbin ah lama aqbali doono waqtigaas kadib.

Markaad gasho tartankan sawirka, waxaad xaqiijineysaa waxyaabaha soo socda:

- Sawirada la soo gudbiyay waa inay ahaadaan kuwo asal ah, oo la abuuray iyo/ama uu qaado tartame. Waa inaysan ku jirin wax walboo ay leedahay ama ay gacanta ku hayaan gacan saddexaad.
- Dhamaan sawirada la soo gudbinayo waa inaysan ku xadgudbin xuquuqda daabacaadda, astaanta ganacsiga, xuquuqda anshaxa, xuquuqda asturnaanta/xayeysiinta ama xuquuqda aqooneed ee qof ama hay'ad.
- Waxaad haysataa ogolaansho ama ogolaansho ku habboon dhammaan dadka iyo dhismayaasha ka muuqda sawirrada. Soo gudbiyayaasha sawirada waxaa laga codsan karaa inay soo bandhigaan foomamka oggolaanshaha ee ay saxiixeen dadka ka muuqda sawirrada oo tilmaamaya in sawirradan lagu wadaagi karo warbaahinta iyo baraha bulshada iyo aaladooyinka kale ee isgaarsiinta Dowladda Mareykanka.
- Waxaad ogolaansho ka haysataa milkiilayaasha xaq u leh dhisme kasta oo gaar loo leeyahay ee ka muuqdal sawirkaaga, si aan ugu adeegsano sawirka warbaahinta iyo baraha bulshada.

****************************************************************************

4. **OGGOLAANSHAHA**

Markaad gasho tartankan sawir:

- Waxaan ogahay in la iga codsan karo in aan soo gudbiyo foomamka ogolaanshaha ee ay saxiixeen dadka ka muuqda sawirada tilmaamaya in sawiradan lagu wadaagi karo warbaahinta iyo baraha bulshada iyo alaadaha kale ee isgaarsiinta.
- Marka ad soo gudbiso sawiradaada tartankan, waxaan siinayaa USAID xuquuq buuxda oo ay ku daabici karaan ama nuqul ka sameyn karaan sawiradaada nooc kasta oo ay ku jiraan daabacaad, shabakada internet-ka, iyo baraha bulshada.
- Waxaan siinayaa xuquuqda daabicida/nuqul ka bixinta USAID iyo hay'adaha kale ee Dowladda Mareykanka inay u adeegsadaan sawirkaaga ujeeddooyinka tartanka iyo sidoo kale daabicidda mustaqbalka ee warbaahinta bulshada, bogagga internetka iyo aaladaha kale ee isgaarsiinta.
- Waxaan USAID siinayaa xuquuqda daabacaadda inay wax ka bedesho sawirka - waa hadii macnaha guud ee sawirka uu sidiisi ahaanayo - oo ay ku jiraan beddelidda iyo ku darista qoraal ama sawir.

**USAID waxay ogolaanaysaa**

- Inay kuu aqoonsato sawir qaade hadii sawirkaaga ujeedo kasta loo adeegsado
- In aysan sawiradaada u isticmaalin ujeedo ganacsi.
- In aysan wax ka beddelin sawiradaada taas oo ka dhalan karta is-beddel macnaha guud.

***********************************************************************

5. **Abaalmarinada**

Qeybta Xirfadlaha

- Kaalinta 1-aad: $500
- Kaalinta 2-aad: $250
- Kaalinta 3-aad: $100

Qeybta Xirfadle aan ahayn

- Kaalinta 1-aad: $500
- Kaalinta 2-aad: $250
- Kaalinta 3-aad: $100

***********************************************************************

Ku guuleystayaasha waxaa lagu ogeysiin doonaa marka hore email ama taleefan ugu dambeyn 20-ka Nofeembar. Ku guuleystayaasha waxaa sidoo kale lagu shaacin doonaa bogga Facebook iyo Twitterka ee USAID Soomaaliya.

Soo gudbinta sawirada waxaa lagu qiimeyn doonaa iyada oo lagu saleynayo hal-abuurka, tayada, asal-ahaanta, ka jawaab celinta degdegga iyo saameynta guud.

Soo gudbinta waxaa qiimeyn doona shaqaalaha USAID iyo la-hawlgalayaashooda. Dhamaan go'aanada waa kama dambeys. USAID waxay xaq u leedahay inay ka joojiso qof kasta oo loo arko inuu yahay mid aan habboonayn ama u dhaqma si aan waafaqsanayn sharciyada tartanka.

Abaalmarinta waa mid aan la isu gudbin karin oo waa in loo diraa goob cayyiman oo ku taala Soomaaliya isla markaana u saxiixo guuleystaha.

Abaabulayaasha tartanku waxay xaq u leeyihiin inay diidaan soo-gudbin kasta oo loo arko inay tahay mid aan habboonayn ama aan waafaqsanayn xeerarka iyo shuruudaha tartanka.